



# SHAQAALAHA CARRUURTA

## Waxyaabo Tixgelin Mudan

### Dadka dhallinyarada kaxeysta ma laha hal calaamad oo lagu garto

- Dadka dhallinyarada kaxeysta badanaa carruurta ayaa aqoon u leh.
- Dadka dhallinyarada kaxeysta badanaa waxay abbaaraan carruurta nugul iyo dhallinta iyagoo u ballanqaada cunto, lacag, dhar, ama hoy.
- Dadka dhallinyarada kaxeysta waxay dhallinta ka qortaan ama kula saaxiibaan goobaha dadku ku kulmo sida maktabadda, suuqa, jardiino lagu nasto, ama iskuul.
- Dadka dhallinyarada kaxeysta badanaa waxay dhallinta ka helaan internetka iyo baraha bulshada ama barnaamijyada lagu wada xiriiro ee taleefanka.
- Dadka dhallinyarada kaxeysta waxay u muuqdaan dad wax kasta haysta, oo iska dhiga inay jawaab kasta hayaan. Waa dad si sahlan oo dhakhso ah loo baran karo.

### Sida carruurta loogala hadlo dadka dhallinyarada kaxeysta ama dhibaateeya

- Carruurta sida ay u badan tahay ma garanayaan in la dhibaateynayo ama la kaxeysanayo. Xataa haddii ay sheegaan wax dhacaya, naftooda isuma arkaan in ay yihiin dhibbaneyaal.
- Ha ku boodin oo ha ceebeyn carruurta haddii ay wax kaaga sheegayaan xaalad la xiriirta dhibaateyn ama kaxeysasho (ama wax kale oo ah dhaawac maskaxeed).
- Jirkooda muuqiisa ayaa muhiim kuu ah. Adiguba ka war hay jirkaaga muuqiisa, iyo carruurta jirkooda, si aad u habsato in aadan carruurta xirxiran.
- Haddii ay carruur aad la hadleyso iska aamusaan ama is xirxiraan, ha ku khasbin arrinta ee ogeysii in ay kula sii hadli karaan markii ay diyaar yihiin.
- Carruurta weydii haddii ay rabaan in ay la hadlaan dadka ka taageera faraxumeynta, qof dabiibe ah, ama qof kale oo ay u aqoonsan yihiin in ay caawimaad ka heli karaan.
- Haddii ay carruurta khatar ku jirto, waxaad u baahan tahay waa in aad la sii xiriirto oggolaansho la'aan, laakiin ka dhigo fursad aad kalsooni uga hesho oo iyagu qeyb ha ka noqdaan hawsha aad u hayso.

### Daryeelidda carruurta la dhibaateeyey ama la kaxeystay

- Carruurta mid kasta baahida iyo adkeysiga waa wax gaar ku ah.
- Kala hadal carruurta adeegyada ay u baahan yihiin ama ay dareemayaan in ay caawimaad u noqoneyso.
- Xusuusnow kaxeysashaha ama dhibaateynta hadda jirta in ay carruurta ku adkaan karto oo ay dhowr jeer in hadba wax lagu dayo ay ku qaadan karto sheegisteeda.
- Waa in la dhowro arrimaha shakhsiga ah ee carruurta. Sheekada ilmaha khuseysa iyagaa iska leh. Si ay dadka oo dhan badqabid u helaan, waxaa muhiim ah in la dhowro xogta macluumaadka carruurta mar kasta oo ay macquul tahay.

## Tallaabooyinka Xiga

- **Haddii ay jirto halis degdeg ah:** garaac 911
- **U soo sheeg ilaalada carruurta ama ciidanka booliska.** Sharciga Minnesota wuxuu waajibinayaa dadka wax soo sheegaya (sida waalidka koriya carruurta loo dhiibo) in ay soo sheegaan haddii ay ogaadaan ama ay sabab ay noqotaba aaminsan yihiin in carruur ama dhallinyaro la silcinayo ama la dayacay, ama ay sidaas ku dhacday saddexdii sano ee ugu dambeeyey. Dhallinyarada loo kaxeysto in galmo looga ganacsado, qof kasta oo danbigaas ku sameynaya waxaa khasab ah in loo sheego ilaalada carruurta. Waalidka ama shaqaalaha carruurta ee aan ku khasbaneyn in ay wax soo sheegaan iyaguba waxay u soo sheegi karaan oo ay caawimaad u weydiin karaan xafiiska ilaalinta badqabka carruurta ee magaalada.
- **Kala hadal shaqaalaha Safe Harbor Regional Navigator.** Haddii aad ka shakiso in carruur aad dhashay ay halis ugu jiraan kaxayesasho ama dhibaateyn, waxaad la xiriiri kartaa shaqaalaha Safe Harbor Regional Navigator si ay u caawiyaan oo ay xafiisyo kale ugu sii xiraan. Adeegyada khariiradda xafiiska Safe Harbor ayaa ku tusaya macluumaadka lagala soo xiriiro iyo adeegyada deegaanka ee gobolka oo dhan ee Safe Harbor Regional Navigators.
- **Sameyso qorshe lagu dhowro badqabidda carruurta.** Kala hadal carruurta in aad la sameyso qorshaha badqabiddooda. Waxaa qorshaha idinku caawin kara abaabulaha gobolka ama Regional Navigator, oo ah hawlwadeen u shaqeeya barnaamijka goobta lagu nabadgalo ee Safe Harbor ama xirfadleyaal kale oo la shaqeeya carruurta. Carruurta kala hadal waxyaabo kala duwan si aad ugu caawiso inaad afka u geliso fikrado ah qorshaha badqabidda iyo tallaabooyin ficil xaqiiqo ah. Intaas waxaa dheer, kala hadal carruurta dadka waaweyn ee ay ku kalsoonaan karaan iyo asxaabta ay wax kala hadli karaan. Ogsoonow in ay wax dhici doona ka soo bixi karaan qorsheynta badqabidda.

## Macluumaadyo

- [Minnesota Department of Human Services Safe Harbor \(https://mn.gov/dhs/partners-and-providers/program-overviews/child-protection-foster-care-adoption/safe-harbor/\)](https://mn.gov/dhs/partners-and-providers/program-overviews/child-protection-foster-care-adoption/safe-harbor/)
- [Center for Parent and Teen Communication \(https://parentandteen.com/\)](https://parentandteen.com/)
- [A Parent's Guide to Human Trafficking \(Polly Klaas Foundation\) \(http://www.pollyklaas.org/safe/a-parents-guide-to-human-trafficking.pdf\)](http://www.pollyklaas.org/safe/a-parents-guide-to-human-trafficking.pdf)
- [National Center for Missing and Exploited Children NetSmartz \(https://www.missingkids.org/netsmartz/\)](https://www.missingkids.org/netsmartz/)
- [Shared Hope: Your Kids and Technology, Parent's Safety Guide \(https://sharedhope.org/wp-content/uploads/2018/11/Designed-Internet-Safety-e-book.pdf\)](https://sharedhope.org/wp-content/uploads/2018/11/Designed-Internet-Safety-e-book.pdf)
- [Love 146: Internet Safety Guide \(https://love146.org/action/online-safety/internet-safety-guide/\)](https://love146.org/action/online-safety/internet-safety-guide/)
- Free webinar presented by the Minnesota Department of Human Services and MNAdopt: [Human Trafficking and Sexual Exploitation: Basics for Foster and Adoptive Families \(https://www.mnadopt.org/product/1187-webinar-human-trafficking-and-sexual-exploitation-basics-for-foster-and-adoptive-families/\)](https://www.mnadopt.org/product/1187-webinar-human-trafficking-and-sexual-exploitation-basics-for-foster-and-adoptive-families/).
- Free online legal resources and search engine for free legal assistance in victim's area: [LawHelpMN.org Providers and Clinics \(https://www.lawhelpmn.org/providers-and-clinics\)](https://www.lawhelpmn.org/providers-and-clinics)
- [National Human Trafficking Hotline Safety Planning \(www.humantraffickinghotline.org/faqs/safety-planning-information\)](http://www.humantraffickinghotline.org/faqs/safety-planning-information)

